

DIB-U-EEGISTA CAHDIGA DEGMADA KING

Cahdiga wuxuu xukumaa Degmadeena oo waxaa dib loo eegaa 10-kii sanaba mar.



Guddiga Dib-u-eegista Cahdiga waxay rabaan inaad u sheegto isbedelada ay tahay inay tixgalinayaan!



SHAQSI AHAAN: Ka qeyb qaado mid ka mid ah afarta kulan ee ka qabsoomaya Hoolalka Magaalada ee guud ahaan Degmada:

<https://www.kingcounty.gov/independent/charter-review-commission.aspx>



ONLAYNKA: Ku soo dir jawaab-ceilntaada iimaylka

CharterReview@kingcounty.gov ama booqo bogga internetka ee dib-u-eegista cahdiga [kingcounty.gov/independent/charter-review-commission](https://www.kingcounty.gov/independent/charter-review-commission)

WAA MAXAY CAHDI MAXAANA LOOGU BAAHAN YAHAY IN DIB LOOGU EEGO?

Sida ku xusan sharciga Gobolka Washington, Degmooyinka waxay ku noqon karaan “Maamul Madax-bannaan” inay sayamstaan cahdi, kaas oo qeexaya sida ay tahay in dowladda loo qaabeeyo oo loo maamulo.

“Cahdiga” wuxuu la mid yahay “dastuurka” marki loo eego maamulada hoose. Cahdiga Degmada King waxaa markii ugu horaysay la ansixiyay 1969.

10-Kii sanaba, cahdiga wuxuu u baahan yahay “Guddiga Dib u Eegista Cahdiga” inay dib u eegaan cahdiga oo ay soo jeediyaan wixii wax ka badel ah. Guddiga waa laan madax-bannaan, oo uu magacaawo Fulinta ayna ansixiyaan Golaha.

MAXAA LA TIXGELIYAA?

- Hanaanka shaqa ka tirista **saraakiisha la soo doorto**
- Xoojinta xuquuqaha **dembi baarista**
- Wax ku biirinta **luqadda ka hortagga takoorka ee hadda jirta**
- Dib u keenida **Garsoorka Degmada** jaga la soo magacaabo ahaan

(Ka fiiri dhanka kale wixii dheeraad ah)



King County

Wixii su'aalo iyo faallooyin ah, la xiriir CharterReview@kingcounty.gov

WAX KA BEDELKA CAHDIGA EE LA SOO JEEDIYAYA WAXAA KA MID AH



WAXQABADKA IYO GEEDI SOCODKA AFTIDA

Isbeddellada farsamada ee la xiriira isku dheellitirka waqtiyada Cahdiga iyo isbeddelada sharciga doorashada ee Gobolka, iyo sharraxaadaha kale oo ku saabsan geedi-socodka.



XAFIISKA KORMEERKA FULINTA SHARCIGA (OLEO)

Sii OLEO (Xafiiska Kormeerka Fulinta Sharciga) awooda bixinta amar maxkamadeed sida ay u noqoto hal sheey oo lagu hubinayo in OLEO ay si hufan u gudato waajibaadka xafiiska.



KU DARIDDA XILALKA HOGGAAMINEED WAXYAABAHA KA REEBAN ADEEGA XIRFADA SHAQADA

Cadday xilalka hoggaanka sare ee ka reeban nidaamka adeegga xirfada shaqada.



HANAANKA SHAQA KA TIRISTA SARAAKIISHA LA SOO DOORTO

Bixi hanaan lagu saaro saraakiisha la soo doortay oo ay kujirto qeexida heerka anshax xumada ee keenta shaqa ka saarida, iyo sidoo kale nidaamka dacwad dhageysiga iyo hanaanka codeynta.



GARSOORKA DEGMADA JAGA LA SOO MAGACAABO AHAAN

Dib uga dhig Garsoorka jaga la soo magacaabo ahaan isla markaana sare u qaad daacadnimada, eex-la'aanta, iyo xirfad-yaqaanimada adiga oo ka fogaenayo siyaasadda xafiiska Garsoorka.



LUQADDA KA HORTAGGA TAKOORKA

Caddee takoor la'aanta iyada oo ku saleysan xaalada daryeele qoys ahaan iyo halyeey ciidan si sharaf leh shaqada looga saaray ama xaalad militari.



DEMBI BAARIS

Sii xuquuqda loo leeyahay la-taliyaha qoysaska marxuumka goorta ay socoto howsha baaritaanka oo caddee in loo baahan yahay in la sameeyo baaritaan marxaladaha uu qofka marxuumka uu ku dhinto xabsiga Degmada.



LUUQADA GURYO OO LA AWOODI KARO

Meesha ka saar luqadda hadda jirta ee mamnuucaysa ku iibinta dhulka uu dadweynaha leedahay in ka yar qiimaha suuqa. Sanadka 2018, sharciga gobolka WA ayaa wax laga badalay si loogu ogolaado dawladaha hoose inay ku iibiyaan dhulka ay dadweynaha ay leeyihiin wax ka yar qiimaha suuqa sii loo helo guryo la awoodi karo.



ISBEDELLADA FARSAMO

Waxay cusbooneysiisaa luuqadda si loo xalliyo qaladaadka naxwe ahaaneed, inay noqoto mid jinsiga u wada dhan yahay, iyo wax ka beddellada kale aan muhiimka ahayn.

Guddiga Dib-u-eegista Cahdiga waxay rabaan inaad wax u sheegto!



SHAQSI AHAAN: Ka qeyb qaado mid ka mid ah saddex kulan ee ka qabsoomaya Hoolalka Magaalada ee guud ahaan Degmada:

<https://www.kingcounty.gov/independent/charter-review-commission.aspx>



ONLAYNKA: Ku soo dir jawaab-ceilntaada iimaylka

CharterReview@kingcounty.gov; ama booqo bogga internetka ee dib-u-eegista cahdiga [kingcounty.gov/independent/charter-review-commission](https://www.kingcounty.gov/independent/charter-review-commission)

Wixii su'aalo iyo faallooyin ah, la xiriir CharterReview@kingcounty.gov